IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

جريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

Sannadka 17aad Muqdisho 26ka Feberaayo 1989 L. 2 R 2

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qumana qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 11 ee 9 Feb. 1989, Oggolaansho Meel marinta Axdiga Saddexaad ee Qaramada Bog; Midoobey ee Xeerka Badda. 85

### QTYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 10 ee 1 Feb. Magacaabid Wasiiro iyo Wasiiro ku Xigeen. » 86

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 11 ee 1 Feb. 1989, Magacaabid Madaxda Ciidammada » 8 7

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 12 ee 1 Feb. 1989, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Miisaaniyadda Sannadka 1989ka. » 88

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 13 ee 2[illegible] Feb. 1989, Magacaabid Nootaayo. » 89

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 14 ee 9 Feb. 1989, Meel_marinta Axdiga Qaramada Mi_doobay ee Xeerka Badda. » 90

DECREE No. 14 on 9 Feb. 1989, instrument of ratification. » 91

QAYBTA SADDEXAAD

[illegible] IGGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha, L. 1 ee 15.2.89 » 92
Aqoonsi Urur Samafalka Haigan.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.2.89, Lumid » 93
2 Jeeg War. ku qoran C/naasir Maxamed Aadan L. 37

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.2.89 Lumid » 94
Jeeg War. L. 1009040 ku qoran Maxamed Yoonis Warsame L. 38

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE 3.2.89, Lumid » 95
Buug Kayd L. 1579 ku qoran Xuseen Rooble Maxamuud L. 39

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89, Lumid » 96
Jeeg War. L. 0303729 ku qoran Cusmaan Xuseen Cali L. 40

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.2.89, Lumid » 97
Buug Kayd L. 28922 ku qoran Cawil Axmed Faarax L. 41

MAXKAMADDA G. MUDUG 7.2.89, Lumid 6 » 98
Jeeg War. ku qoran Maxamed Cali Jaamac L. 42

MAXKAMADDA G. MUDUG 13.2.89, Lumid » 99
Jeeg War. L. 1396156 ku qoran Axmed Ca_li Maxamed L. 43

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 3.12.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Xaliimo Jaamac Maxamuud L. 44 » 100

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.2.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Shirkadda Soomaali Airlines L. 45 » 102

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.2.89 Lumid Jeeg War. L. 1022935 ku qoran Maxamed Faarax Barre L. 46 » 103

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Axmed Aadan Bakaal L. 47 » 104

MAXKAMADDA G. MUDUG 7.1.89 Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Yaasiin Maxamed Aadan L. 48 » 105

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.1.89 Lumid Jeeg War. L. 0273587 ku qoran Soomaali Airlines L. 49 » 107

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0852510 ku qoran Cabdullaahi Cabdi Maxamed L. 50 » 108

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0800620 ku qoran Maxamed Maxamuud Xuseen L. 51 » 109

LUNA AFRICA BOTLING COMPANY, Isugu yeerid Shir Saamileyda Shirkadda L. 52 » 110

MAXKAMADDA G. BANAADIR 23.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0279005 ku qoran Xaaji Abuukar Maxamed L. 53 » 111

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.2.89 Lumid Jeeg War. L. 0832009 ku qoran Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar L. 54 » 112

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 11, taariikh 9.2.1989: Oggolaansho Meelmarinta Axdiga Saddexaad ee Qarammada Midoobay ee Xeerka Badda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Axdiga Saddexaad ee Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha oo ka dhexeeya Dawladaha meelmariya Axdiga.

2. Axdigan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Axdiga ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Qod. 308 ee isla Axdigaas.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Axdigani.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 9.2.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QTYBTA LABAAD

XEER

Xeer Madaxweynaha JDS L. 10 ee 1.2.1989: Magacaabid Wasiirro iyo Wasiirro Ku_xigeen.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 7aad, Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 kuna saabsan wax ka beddelilda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyey, kuna saabsan nidaamka Dhismaha Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: Dib u habeynta qaab dhismeedka Ciidammada Qalabka Sida gaar ahaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo baahida loo qabo in loo magacaabo Wasaaradda Gaashaandhigga Wasiir cusub iyo Wasiir ku-xigeen;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in dib loo soo celiyo dhismaha Wasaaraddii Dalxiiska.
3 Jaalle S/Gaas Aadan Cabdullaahi Nuur: Wasiirka Dalxiiska;
4 Jaalle Dr Maxamed Cabdi Yuusuf: Wasiir Ku_xigeen
Joona magacaabo Wasiir iyo Wasiir Ku_xigeen;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaallayaasha soo socda waxaa loo magacaabay xilka mid waliba ku hor qoran:

1 Jaalle Dr Xuseen Sheekh Cabdiraxmaan: Wasiirka Gaashaandhigga;

2. Jaalle S/Guuto Maxamed Saciid Xirsi: Wasiir Ku_xigeen;

Qod. 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 1.2.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 11 ee 1.2.1989: Magacaabidda Madaxda Ciidammada Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka; JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Dib u habeynta qaab dhismeedka Ciidammada Qalabka Sida, gaar ahaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, lagama maarmaanna ay ugu muuqatay in loo magacaabo Talisyada Xoogga Dalka Soomaaliyeed Taliyeyaashii hoggaamin lahaa;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaallayaasha soo socda waxaa loo magacaabay xilalka mid waliba ku hor qoran:

1. S/Guuto Maslax Maxamed Siyaad: Taliyaha Ciidanka Lugta;

2. S/Guuto Maxamed Nuur Dhude: Taliyaha Ciidanka Cirka;
3. Admiraal Guuto Saciid Cabdalla Cumar: Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha iyo

4. S/Guuto Siyaad Daa'uud Gudaal: Taliyaha Ciidanka Difaaca Cirka.

Qod. 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.2.1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 12 ee 1 Feb. 1989: Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Miisaaniyadda Sannadka 1989ka:-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Dekreetada Sharciga ee soo baxday 23kii Dishembar 1961, Lr. 2 Amarka Maamulka Xisaabaadka;
ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20 Marso 1965 L. 13 Xeer nidaaminta Abaabulidda Guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriirey iyo wixii beddelaad gashay;

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahan yahay Sarkaal shaqaale loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada JDS iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca: Agaasimayaasha Guud-Xafiisyada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamay sharcigii Lr. ahaa 1 ee 4.1.68, iyadoo uu siinayo awood Maamulidda, qardeysiga ku tala gelidda kharashka shaqo socodsiinta, isku duwidda iyo soo bandhigidda Xisaabaadka la gareysan karo kuna saabsan qareedada (soo hormarin) la sameeyo, oggolaashada Ruqsadda Dhoofka Safarrada Dibedda iyo gunnadaba.

D E K R E E T A:

Sarkaal la yiraahdo Jaalle Maxamed Xaaji Cabdi (Fartaag» — Darajo A/2 Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta MJDS, waxaa loo magacaabay Sarkaal wakiileed kharashka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacagta MJDS iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, laga bilaabo 1da Jannaayo 1989ka.

Dekreetadan waxay dhaqan galeysaa haddatan isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Feb. 1989

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 15
Muqdisho. 1 Feb. 1989

Xeer Madaxweynaha JDS L. 13 ee 27 Dis. 1988: Magacaabid Nootaayo.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan hawsha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Qod. 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si toos ah iyo tartan la'aan u magacaabo Nootaayo qofku mudan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Ibraahim Cusmaan Mursal Maxamed waxaa loo magacaabay Nootaayo, wuxuuna hawshiisa Nootaayonimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 27.12.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 14, taariikh 9.2.1989: Meelmarinta Axdiga Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 11 ee 9ka Febraayo 1989 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Axdiga Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Axdigan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Axdiga Qarammada Midoobay ee Xeerka Badaha iyo Lifaaqyadiisa oo lagu saxiixay magaalada Montego Bay ee Dalka Jamaaika 10kii Disember 1982.

Qod. 2aad

Axdiga kor ku tilmaaman ee Xeerka Badaha iyo Lifaaqyadiisu waxay Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaan awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, **9.2.1989**

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 14, of the 9th Febraury 1989: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: he Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 11 of the 9th February 1989 on the base of which the People's Assembly has approved the Convention specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Convention.

HEREBY PROMULGATES

The fellowing Decree:

Article 1

The United Nations Convention on the Law of the Sea, and its Annexes, signed in Montego Bay, Jamaica, on the tenth day of December 1982, is hereby ratified.

Article 2

The above mentioned Convention and its Annexes shall have the force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon be published on the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 9.2.1989

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 1 ee 13.2.1989 Aqoonsi Urur Samafalka Halgan.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30,7.84 ee Lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54. 2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah. WWW

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururada Noocani ah.

WUXUU GUDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Halgan oo ah Urur Samafal, Ujeeddadiisuna tahay Gurmadka iyo Daryeelka Dadwaynaha Soomaaliyeed ee ku nool J.D.S Gobolladeena markay ay la kulmaan xaaladaha adag oo ay sababeen Aafooyinka Dabiiciga ah.

Qodobka 2aad

Ururku wuxuu saldhigiisu noqonayaa magaalada Muqdisho wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobolada iyo degmooyinka Dalka.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiiku Arrimaha Gudaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.2.89.

Wasiirkaa Arrimha Gudaha

Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

### MAXKAMADD AGOBOLKA BANAADIR

### QAYBT AMADANIGA

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdinaasir Maxamed Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0799507_0147802 laga sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So 50.000 iyo Sh.So 20 000 kuna qoran magaca Cabdinaasir Maxamed Aadan sida ku cad warqadda Lr. 1465 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lam. 0799507_0147802 kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 70.000 kuna qoran magaca Cabdinaasir Maxamed Aadan lagana sameeyey Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boosaaso ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Cabdinaasir Maxamed Aadan Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 70.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 37

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Aadan Habane Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1009040 Lag sameeyay L/1aad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga Iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Yoonis Warsame Sida ku cad Warqadda Lr. 1467 ee Bankiga Ganacsiga Iyo keydka Soomaaliyeed Qeybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1009040 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Yoonis Warsame lagana sameeyay L/1aad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

### WAXAA LA AMRAYAA

L/1aad Hargeysa ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Aadan Habane Maxamed Lacagta Cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Iaddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.2.1989.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 38

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE MARKA

MARKUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN.

MARKUU ARKAY: Buugga Keydka Lr. 1379, Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qornevd Lacag dhan sh.so. 174.950/ (Boqol todobatan & Afar kun ivo sagaal boqol ivo konta) Shillin. uuna lahaa Xuseen Rooble Maxamuud sida ku cad Warqadda Lam. Yahav 000056 Tr Tahay 4 2 89 kana soo baxdav Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliveed Laanta Marka. HH HHH

MARKUU ARKAY: Qod 69 ee Sharciga Lr yahav 9 Tr. 11 9 1965 No. 2

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B./Keydka Lr. 1379, Kuna qoran magaca Xuseen Rooble Maxamuud, ayna ku jirto Lacag dhan sh.so 174 950 (Boqol todobaatan iyo Afar kun, Sagaal boqol iyo konton) Shilin.

WAXAA LA AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedelo Xuseen Rooble Maxamuud, Buugga kor ku Tilmaaman una sameeyo mid la mid ah, ka dib markii ay ka soo wareegato muddo dhan 15 maalmood gudahood maalinta go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax ishortaag ah.

GUDDOOMIYAHA M. G. SH/HOOSE
(Saylac Sheekh Cumar)

L. 39

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
## QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cawad Cali.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0303729 oo laga sameeyay L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, kuna jirto Lacag dhan sh.so. 386.000 kuna qoran magaca Cusmaan Xuseen Cali sida ku cad warqadda Lr. 1334 ee Bankiga Ganacsiga iyo Key dka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0303729 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 386.000 kuna qoran magaca Cusmaan Xuseen Caci lagana sameeyey L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Wardhiigley ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed In ay siiso Maxamed Cawad Cali Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 386.000 oo ah baddelkii J/War. kor kuxusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax si hortaag ah Laga keenin.

Muqdisho, 7.2.89.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 40 WW

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cawil Axmed Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu lumay Buug Kayd Lam. 28922 laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 13.746.46 kuna qoran magaca Cawil Axmed Faarax sida ku cad warqadda lam. 0078 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Shareciga Lr. 9.9.1952.

WUXUU XEERIYEY

in la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lam 28922 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 13.746.46 kuna qoran magaca Cawil Axmed Faarax lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cawil Axmed Faarax lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 13.746.46 oo ah bedelkii Buug Kaydka oo kor ku xusan markii ay kawareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenii.

Muqdisho, 4.2.1989

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 41

GUDDOOMIYAHA M.G. MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 7.2.89, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaalieed Laanta Gaalkacyo kuna soo muujiyeen inay Jeegagga Wareega oo hoos ku qoran ay ka lumeen Jaalle Maxamed Cali Jaamac;

HADDUU ARKAY: Lambarrada Jeegagga Wareega ee uu Bangiga Ganacsiga ku soo tilmaamay ama ku qoray warqaddiisa taariikhdiisu kor ku xusan tahay, laguna caddeeyey in Jeegaggaasi sharci ahaan uga wareegeen gacanta Jaalle Maxamed Cali Jaamac, ayna ka lumeen baafin guudna laga sameeyey;

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer sharci Lr. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In la baafiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan oo lumay kalana ah:-

| | |
|---|---|
| 1. J.W.Lr. 1308647 ee la qoray 22.12.88, | Sh. So. 100.000 |
| 2. J.W.Lr. 1308648 ee la qoray 22.12.88, | Sh. So. 100.000 |
| 3. J.W.Lr. 1395862 ee la qoray 26. 1.89 | Sh. So. 100.000 |
| 4. J.W.Lr. 1395863 ee la qoray 26. 1.89 | Sh So. 100.000 |
| 5. J.W.Lr. 1395864 ee la qoray 26. 1.89 | Sh. So. 100.000 |
| 6. J.W.Lr. 1395860 ee la qoray 26. 1.89 | Sh. So. 100.000 |

WUXU UAMRAYAA OO KALE

In Jaallahaas loogu beddelo Jeegag cusub oo u dhigma kadib markii amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto muddo (30) soddon maalmood ah, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Maxamed Cali Jaamac amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 7.2.1989

GUDDOOMIYAHA M. G. MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hiloowle Cali)

L. 42

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA M.G. MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 12.2.89, kana soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo kuna soo muujiyeen inuu Jeegga Lam. 1396156 ee la qoray taariikhda 29.1.89 uuna leeyahay Jaalle Axmed Cali Maxamed ka lumay, isagoo Jeeggaasi laga sameeyey Bangiga Laanta Gaalkacyo, kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqol kun);

HADDUU ARKAY: In Jeegga Lambarkiisu kor ku xusan laga diray baafin.

WUXUU AMRAYAA

In la baafiyo Jeegga Lambarkiisu sare ku qoran yahay.

HADDUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer Sharci ahaa Lr. 2 soona baxay 9.9.1965tii.

WUXUU AMRAYAA OO KALE

In Jaallahaas loogu beddelo Jeeg cusub oo u dhigma kii ka lumay, kadib markii amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ahee Dowladda, ayna ka soo wareegto muddo (30) soddon maalmood ah, waaa nin Jeegga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Axmed Cali Maxamed amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 13.2.1989

GUDDOOMIYAHA M. G. MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hiloowle Cali)

L. 43

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, HARGEYSA

MGH/33/88 3.12.88

UJ. Degreeto cusboonaysiin J.W.Lr. 0088426, 18.4.88 Sh. So. 500.000 iyo 0088427, 18.4.88 Sh.So. 300.000 labaduba ku qoran yihiin Xaliimo Jaamac Maxamuud lagana sameeyey labadaba Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Xaliimo Jaamac Maxamuud 27.11.83 kuna codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee kor ku xusan oo ka lumay;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa Laanta 3aad ee Lambarkiisu yahay 39 lana qoray 27.11.88 ee Bangigu ku soo caddeeyey in Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay iska leeyihiin astaamaha ujeedada ku xusan, loo kala diray laamihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Hargeysa Laanta 3aad Lr. yahay 39 ee 30.11.88 ee lagu soo caddeeyey Jeegagga iyaga ah;

MARKUU ARKAY: In Lacagta ku qoran Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay iska leedahay Xaliimo Jaamac Maxamuud;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kan sal gareeyo loona cusboonaysiiyo Xaliimo Jaamac Maxamuud cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ma ciddii ay

awood buuxda u soo siiso ee ka haysata awood buuxda muddo 15 beri ah gudahood.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu Nuqul Go'aankan ka mid ah ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ay uga soo qorato cabasho haddii ay doonayaan.

Guddoomiyaha Max G W/Galbeed Hargeysa
(Maxamed Yuusuf Caynaan)

Kaaliyaha Max G.W. Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Yaxye Xaaji;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0301947-0301948 laga sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 142.800 isugeyn Sh.So. 285.600 kuna qoran magaca Shirkadda Soomaali Airlines, sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga lam. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War ee Lam. 0301947-0301948, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 285.600 kuna qoran magaca Shirkadda Soomaali Airlines laguna sameeyey Laanta 3aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, in ay siiso Jaalle Saciid Yaxye Xaaji lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 285.600 oo ah bedelkii Jeegagga War. markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 45

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Barre Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1022935 oo laga sameeyey Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga ivo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So 100 000 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Barre sida ku cad warqadda lambar 1513 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boorame:

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9 9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 1022935 kuna jirto lacag dhan Sh So 100 000 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Barre lagana sameeyey Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boorame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Axmed Barre Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So 100 000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ka hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 46

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Aadan Bakaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee Lambarradoodu hoos ku taxan yihiin kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna kala qoran J.le Cawaale Diiriye Xirsi iyo J.le Xasan Diiriye Xirsi, sida ku cad warqadda lam. 1263 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, waana sidatan:-

| | | | |
|---|---|---|---|
| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
| 1387613 | 100.000 | Cawaale Diiriye Xirsi | 4/Xamar |
| 0744068 | 50.000 | » » » | » |
| 0744069 | 50.000 | Xasan Diiriye Xirsi | 4/Xamar |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku qoran yihiin laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magacyada J.le Cawaale Diiriye Xirsi iyo J.le Xasan Diiriye Xirsi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad Xamar, in ay siiso J.le Axmed Aadan Bakaal lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 47

MAXKAMADDA RACFAANKA GOBOLKA MUDUG

MR/GM/5-1/88 Gaalkacyo, 7.1.1989

Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Mudug

MARKUU ARKAY: Codsiga Yaasiin Maxamed Aadan oo uu ku sheegay in ay ka lumeen Jeegagga wareega ee ay Lambarradoodu kala yihiin:-

1. J.W.Lam. 0930981 ee 5.12.87 Sh.So. 100.000 oo ku qoran Cabdi Daahir Cali oo laga sameeyey Laanta Saad ee Hargeysa.

2. J.W.Lam. 1015175 ee 5.2.88 Sh.So. 100.000 oo laga sameeyey Laanta Hargeysa.

3. J.W.Lam. 1305488 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Max'd Guuleed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

4. J.W.Lam. 1305490 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Ma'd G leed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

5. J.W.Lam. 1305489 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Max'd Guuleed lagana sameeyey B.G.&.K. Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo.

6. J.W.Lam. 1305500 ee 29.11.88 Sh.So. 100.000 oo ku qoran C/qaadir Ma'd G leed lagana sameeyey Laanta Gaalkacyo.

7. J.W.Lam. 1183512 ee 20.11.88 Sh.So. 100.000 ku qoran Maxamed Cartan Diiriye lagana sameeyey B.G.&.K.S. Laanta Laas-caanood.

8. J.W.Lam. 071834 ee 19.9.88 Sh.So. 40.000 oo ku qoran Yuusuf Maxamed Diiriye lagana sameeyey Laanta Laas-caanood.

MARKUU ARKAY: Warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ee 5.1.1989 ee Laanta Gaalkacyo ku soo caddeysay jiritaanka Jeegaggaas lumay horeyna Laanta Berbera looga baafiyey;

MARKUU KU QANCAY: Inay doodda dacwooduhu runtahay;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69 ee Xeer Lambar 2 soona baxay 9.9.1965;

ISAGOO OGAADAY: Inay Maxkamaddii Gobolku ka

maqan tahay Soohdinteeda;

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas kor ku xusan ee lumay la baabi'iyo bed-delkoodiina uu u sameeyo Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Ganacsade Yaasiin Maxamed Aadan oo deggan Gaalkacyo 30 maalmood kaddib marka Dekereetadan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharash-ka Faafinta uu Dacwooduhu iska bixinayo.

Dekereetadan waxaa la sugay lana saxeexay maanta oo ah 7dii Jannaayo, 1989ka.

Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Mudug
(Dr. Cabdullaahi C.M. Dheegsan)

L. 48

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Axmed Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0273587 Laga sameeyey L/Wadajir ee Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh so 142.000 kuna Qoran magaca Soomaali Air Lineeys sida ku cad warqadda Lr 0610 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Wada Jir

HADDUU ARKAY: Qod 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0273587 kun
In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0273587 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 142.000 kuna qoran magaca Soomaali Air Lineeys lagana sameeyay L/Wada Jir ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wada jir ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Maxamed Axmed Faarax Lacagta Cadadkeedu tahay sh.so. 142.000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 49

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cabdullaahi Cabdi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0852510 oo laga sameeyey L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 25.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Cabdi Maxamed sida ku cad warqadda Lr. 1287. ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0852510 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 25.000 kuna qoran magaca C/lahi Cabdi Maxamed Lagana sameeyey L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso Maxamed C/lahi Cabdi Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 25.000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood Laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.2.89.

**GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 50 H

MAXKAMADDA GOBOLK ABANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/risaaq Xasan Cabdulle;

HADDUU TIXGELIYEY: In lumay Jeeg War. Lam. 0800620, laga sameeyey Laanta Laascaanood ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100 000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Xuseen sida ku cad warqadda lam. 1676 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Laascaanood;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0800620, ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Xuseen lagana sameeyey Laanta Laascaanood, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Laascaanood ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le C/risaaq Xasan Cabdulle lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 51

LUNA AFRICA BOTTLING COMPANY

UJEEDDO: ISUGU YEERID SHIRKADDA SAMILEYDA

LUNA AFRICA BOTTLING CO.

Waxaa Laysugu Yeerayaa Samileyda In ay ugu Yimaadan Shir Weyne Loga Hadlo Arrimaha Hoose Ku Qoran Tariikhdu Markey Tahay 20.2.1989 Saacadu Tahay 16, Galabnimo Xarunta Shirkadda, haddii ay suura gal noqon weydana waxaa la qaban doonaa 1.3.89 isla saacadda kor ku qoran.

10) Xal Deg Deg ah u helid halag dhaqaale oo Shirkadda Haysta iyo dhibaatooyin la xarira.

20) Deyin lagu leeyahay bixinteda.

30) Maalgelin Cusub oo ay u bahantahay sii gobta ay ku Taal loga raro biyo La'aan awgeed.

40) Magacabid Gudi Arrimahas oo dhan xal deg deg ah u hela ee Maamul.

50) Wixi kale oo arrimaha xalkoda la xarira waa laga hadlikara go'aanna waa laga gaarikaraa.

LUNA AFRIGA BOTTLING CO.

L. 52

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Nuur Maxamuud Gaas, Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Shamiitada Berbera;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0279005 kuna qoran magaca Xaaji Abuukar Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1827 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaha Guud, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 163.200;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0279005 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 163.200 kuna qoran magaca Xaaji Abuukar Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.le Nuur Maxamuud Gaas, Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Shamiintada Berbera, lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 163.200 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaan ah laga keenin.

Muqdisho, 23.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 53

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Shirkadda Al-Qamar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0832009 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar, sida ku cad warqadda lam. 1285 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 2aad Xamar.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0832009 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Shirkadda Ganacsiga Al-Qamar, lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Shirkadda Ganacsiga Al—Qamar lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 54

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xuseen Kamas Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0263407 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 142.760 kuna qoran magaca Soomaali Airleyns sida ku cad warqadda lam. 2098 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0263407 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 142.760 kuna qoran magaca Soomaali Airleyns.

## WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso Jaalle Xuseen Kamas Xasaan lacagta ca- dadeedu tahay Sh.So. 142.760 oo ah bedelki Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa- finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)